

Hubinta Helitaanka Caymiska Caafimaadka ee Dhammaan Dadka jooga Oregon



Boqolkiiba lix dadka Oregon ma laha caymis caafimaad

Qiyaastii boqolkiiba lix dadka Oregon ma laha caymiska caafimaadka. Boqolkiiba lixdan, qaar badan waxay xubno ka yihiin Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) kuwaasi oo ku waaya caymiskooda caafimaadka marka si ku meelgaar ah uu mutaysigoodu isku baddalo, sida inay lacag badan shaqeeyaan hal bil. Marka dadku waayaan caymiska—xitaa muddo kooban ha noqotee—waxay ka maqnaadaan ballamo daryeelka caafimaadka ah waxayna la xiriiri kari waayaan adeeg-bixiyayaashooda, taasi oo ka dhigan inayna daryeel helin marka ay u baahan yihiin. Dib u dhiggida daryeelku wuxuu dadka ku sababaa inay sii xanuunsadaan, u baahdaan daryeel *dheeraad* guud ahaan, oo aakhirka kharash badan uga baxo.

Ka dhaafidda cusub, Oregon waxay qorshaynaysaa inay dadka uqalma u fududayso inay helaan caymiska OHP, si ay ugu fududaato xubnaha OHP inay caymiska ku jiraan.

Caymis la'aanta ee lambarada

Dadka aan caymiska lahayn ee Oregon waxay uqalmaan caymiska caafimaadka Medicaid ama Marketplace.



Qiyaastii 60% carruurta aan lahayn caymiska caafimaadka ee Oregon waxay u qalmaan OHP.



Qiyaastii 25% dadka waawayn ee aan lahayn caymiska caafimaadka ee Oregon waxay u qalmaan OHP.




Ugu dhawaan 50% dadka aan lahayn caymiska ee Oregon waxay heli karaan caawimo ah iska bixinta lacagta caymiska caafimaadka iyagoo u maraya Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace.



Ka badan 30% dadka aan lahayn caymiska waxay sheegeen inay waayeen OHP, xogta ka timi Xogururinta caymiska Caafimaadka ee Oregon-na waxay ku talisay in dad badan oo kuwan ka mid ah ay wali dhici karto inay u qalmaan OHP.

Dadka ka tirsan bulshooyinka midibka iyo bulshooyinka Qabaa'ilka waxay ugu dhawaan laba jeer u dhaw yihiin inay bilaa caymis ahaadaan.



Xeelado iman kara si caymis loogu sameeyo dadka badan oo Oregon ku sugan

Hoos waxa ah saddex xeeladood oo Maamulka Caafimaadka Oregon uu qorshaynayo inuu oggolaansho ka waydiisto dawladda fadaraalka inay bixiso:

- 1. Diiwaangalinta carruurta ee OHP oo joogtada ah, laga bilaabo markay dhashaan ilaa lix jirkooda.** Tani waxay ka dhigan tahay in carruurta ay sii haysan doonaan caymiskooda ilaa ay lix jir gaarayaan ayna sii wadan karaan inay la kulman isla bixiyayaasha daryeelka caafimaad ee hore, taasi oo keenaysa natiijooyin caafimaad oo wanaagsan. Waalidiinta iyo daryeelayaasha ciyaalka ku jira OHP, tani waxay ka dhigan tahay inay jiri doonaan waraaqo sidii hore ka kooban, iyo walaac sidii hore ka yar marka la eego haddii isbaddal yar oo dhanka dakhliga ah uu ka dhignaan doono ilmuhu inuu lumiyay caymiska daryeelka caafimaadkiisa.
- 2. Sii socoshada laba sano ee isdiiwaangalinta OHP ee dadka da'doodu tahay lix jir iyo ka badan, xitaa haddii dakhligoodu isbaddalo.** Dad badan oo waaya caymiska caafimaadka OHP waxay keliya u qalmaan muddo kooban kadibna dib ayay ugu soo biiraan OHP. OHP-gan "kolba isbaddalaya" wuxuu dhaawacayaa natiijooyinka daryeelka caafimaadka *wuxuuna* ku joogaa cashuur-bixiyayaasha lacag marka la eego shaqada maamuleed. Ayadoo la siinaayo diiwaangashanaan joogto ah oo laba sano ah iyadoon loo baahan in wax la baddalo haddii dakhligu isbaddalo, dadku waxay heli doonaan natiijooyin caafimaad oo wanaagsan.
- 3. Hab dhakhso ah oo fudud oo ay isku diiwaangalin karaan OHP dadka dalbada faa'idooyinka Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kabka ah (SNAP).** Dad badan oo u qalma SNAP ayaa sidoo kale u qalma caymiska caafimaadka OHP. Marka loo eego lifaaqa 2021 ee xubnimada SNAP, 17% dadka waawayn iyo 6% carruurta kuwaasi oo hela SNAP waxay ahaayeen qaar u qalma laakiin aan helin caymiska caafimaadka OHP. Oregon waxay rabtaa inay dadkan u sheegto inay sidoo kale heli karaan daryeel caafimaad oo bilaash ah kana caawiso inay isdiiwaangaliyaan. .

Waxa ay tani uga dhigan tahay xubnaha OHP

Dadka u qalma ee laakiin aan ka diiwaangashanayn OHP: Ka dhaafidda cusub, way u fududaan doontaa dadka u qalma inay iska diiwaangaliyaan OHP. Oregon waxay gaari doontaa dad badan iyadoo adeegsanaysa luuqado kala duwan, saaxiibo ay ku kalsoon taha iyo ururada bulshada ku salaysan. Tani waxay ka dhigan tahay dadka u qalma inay kula hadli doonaan cid ay ku kalsoon yihiin luuqadda ay doonayaan. Marka dadka Oregon ay iska diiwaangaliyaan dheefaha kale (sida kaalmada cuntada), sidoo kale waxay heli doonaan macluumaad ku saabsan iska diiwaangalinta OHP.

Ku saabsan xubnaha OHP: Xubnaha OHP waxay noqon doonaan qaar muddo sidii hore ka dheer caymiska u hela. Wakhtigan la joogo, xubnuhu waxay u baahan yihiin inay dib isku diiwaangaliyaan sanad kasta, wayna waaynayaan caymiska haddii wax iska baddalaan u qalmitaankooda (sida isbaddalka dakhliga). Ka dhaafidda cusub, xubnuhu u baahan maayaan inay dib isku diiwaangaliyaan sida badan, isbaddalada kumeel gaarka ah ee u qalmida ku yimaaddaana ka dhigi maayo inay waayaan OHP.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Community Partner Outreach Program community.outreach@dhs.oh.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.